

WAXAAD U BAAHAN TAHAY INAAD KA OGAATO

Aqoonsiga cusub I.D. Baajka ee ardayga

Aqoonsiga I.D. Kaarka ayaa in muddo ahba looga adeegsanaayey iskuulada dadweynaha ee dalka oo dhan. Kaararka waxay bixiyeen aqoonsi, waxay sugaan amniga ardayga, waxaana loo isticmaalaa ujeedooyin badan oo wax ku ool ah inta lagu guda jiro maalin iskuuleedka ardayga. Mahad waxaa leh codbixiyayaashii ansixiyey canshuurta maalgelinta Amniga iyo Teknolojiyada ee referendumkii 2019, Iskuulada Degmada Bariga Carver County ayaa dhawaan qaybin doona aqoonsi I.D. Baaj ah oo uu xiran doono arday walba.

Ujeedada ugu horeysa ee I.D. Baajka aqoonsiga cusub waa in lagu wanaajiyo amniga ardayga iyadoo la raadinayo goorta – iyo meesha- ardaygu ka fuulayo ama ka baxayo baska iskuulka degmada. Baajka Aqoonsiga ayaa sidoo kale loo isticmaali doonaa lacag bixinta cuntada, in lagu hubiyo buugaagta iyo agabyada khayraadka ee laga helo xarunta warbaahinta meediyaha ee iskuulka, iyo in lagu saxexo jadwalka isbadalida waqtiga fasalka ardayga.

Gu'gii la soo dhaafay, Ardayda dhigata dugsiga hoose ee Jonathan ayaa si guul leh ku tijaabiyey aqoonsiga ID Baajka cusub. Talaabada xigtana waa in loo qaybiyo Aqoonsiga ID baajka la xirto dhamaan ardayda Dugsiga Hoose iyo kuwa Dugsiga Dhexe. Ardayda Dugsiga Sare waxaa la siin doonaa ID Baajyo cusub oo lagu badali doono ID kaararkoodii hore.



Waa nooc ee xogta ardayga ee lagu kaydinayo I.D. baajka?

Koodhka QR-ka, Numberka barkoodhka, iyo koodhka RFID ee ku jira Baaj kasta ayaa ku xiran nidaamyada maareynta ardayda sida gaadiidka, xarunta meediyaha, lacag-bixinta cuntada iyo jadwalka isbadala. Baajjka dugsiyada Hoose iyo dhexe ma lahaan doonaan sawirka ardayga. Baajka cusub ee Dugsiga Sare wuxuu u ekaan doonaa sidii kuwii hore, laakiin waxay sii haysan doonaan sawirka Iskuulka ee ardayga sidi hore oo caadiga ahayd maadaama aqoonsiga sawirka badanaa loo isticmaalo ujeedooyin kale oo ka baxsan iskuulka una baahan sawir ansax ah.

Maxaa dhacaya hadii ilmahaagu lumiyo aqoonsiga ama Baajka?

Waxay ku xiran tahay heerka fasalka iyo in ilmahaagu baska raaco iyo in kale, Cunugaaga wuu soo xiranayaa Baajka markuu guriga aadayo waxaana laga filayaa inuu u soo xirto iskuulka maalin walba. Hadii Baajku lumay ama burburay iyo/ama xarigiisa lanyardka waxaa lagu badalayaa xafiiska Iskuulka si lacag la'aan ah.

Ardaygu ma heli doonaa Baaj cusub sanad walba?

Si loo yareeyo kharashka Baajka lama badali doono sanad kasta. Baajj cusub waxaa loo qaybin doonaa ardayda markay galayaan fasalada 3, 6 and 9.

Sidee Baajka loogu adeegsan doonaa in ardayga baska kor galaga socdo?

Marka ardaydu fuulayaan ama ay ka dagayaan baska, waxay baajkooda marinayaan iskaanar ku yaala dhash-boorka baska. Nidaamka gaadiidka ayaa wuxuu diiwaan galinayaa magaca ardayga, waqtiga la mariyey iyo goobta basku taagan yahay. Macluumaadkaas ayaa isla markiiba wuxuu u gudbayaa shaqaalaha gaadiidka raadraacida

safarka ardayda. Caruuraha sida joogtada ah u raaca bas loo qoondeeyay wadada khaas u ah waxay waalidi-intoodu awood u helayaan inay kor kala socdaan marka ardaygu soo galayo ama ka baxayo baska ayagoo isticmaalaya barnaamijka **MyStop** app oo bilaash ah.

Maxaa dhacaya hadii ardaygaygu fuulo bas khaldan ama uu saaxiib la raaco bas kale?

Hadii ardaygu fuulo baska isaga/iyada aysan ku qornayn, nidaamku wuxuu ku baraarujinayaa darewka baska inuu la hadlo ardayga ka hor inta aan loo ogolaan inuu isaga/iyada inuu raaco.

Ilmuhu baaj la'aan ma raaci karaa baska?

Hadii ilmuhu iloobo inuu xirto baajka marka uu iskuulka u sii socdo ama ka soo noqonayo, darewka baska ayaa wuxuu awood u leeyahay inuu gacantiisa iskaanarka kaga eego magaca ilmaha. Hadii ilmahaaga aan loo qoondeynin dariiqa baska marayo, iskaanarka ayaa ogaysiinaya darewka isla markaana isaga/iyada waxay la hadlayaan ardayga si loo hubiyo inuu jiro qoraal ka imaanaya waalidka ama ogolaansho cadaynaysa in ardaygu uu raaci karo.

Ilmahayga ma raadraaci karaa markay aadayaan safarka rixlada iskuulka?

Basas kala duwan ayaa loo isticmaalaa marka ardaydu aadayaan safarada rixlada. **MyStop** lagama raadraaci karo basaska sidii caadigii aan loo qoondeynin inay raacaan ama ku yimaadaan iskuulka.

Halkee macluumaad badan ka ogaan karaa?

Daawo muuqaal kooban oo ku saabsan Aqoonsiga I.D. baajka cusub iyo macluumaad dheeraad ah **MyStop** at eccs.mn/badges.